

**Xog ku saabsan sidii aad u diiwaan gelin lahayd sidii aad
Maxkamadda uga codsan lahayd in dadweynaha lagaa qarinyo
xogta guri ka saarista**

**Sidaad u wargelin lahayd Lahayd Hay'adaha
Baara Kiraystayaasha In Lagaa Saaray Diiwaanka Maxkamadda Guryaha**

Page 1: Tilmaamaha aad raacayso Page 2: Warqadda Foomka ah ee aad u dirayso Hay'adaha Baarista Kireystayaasha Page 3: Liiska Hay'adaha Baara Kireystaha
--

I. Haddii Dhexdhexaadiyaha ama garsooraha Maxkamadda Guryaha uu amray in diiwaankaaga laga saro in guri laga saaray, xoghaynta maxkamaddu wuxuu:

- 1) Xirayaa faylka;
- 2) Ka saaraayaa dacwadda diiwaanka kombiyuutarka ee maxkamadda.

II. Ka saaridda diiwaanka maxkamaddu ka saari mayso dacwadda faylasha hay'adaha baara kiraystayaasha. Waxaa laga yaabaa in hay'adahani aysan ogayn in dacwadda laga saaray diiwaanka illaa aad adigu wargeliso. Warqadda foomka ah ee ku lifaaqan waxaa loo isticmaali karaa:

- 1) In aad ogaysiiso hay'adaha baara kiraystaha in kiis kaaga laga saaray diiwaanka; iyo
- 2) In aad kaga codsato hay'adaha baara kiraystayaasha in ay faylashooda iyo diiwaanadooda ka saaraan dacwadda laga saaray diiwaanka si aan mar dambe loogu sheegin kuwa kireeya guryaha.

III. Si aad u ogaysiiso hay'adaha baara kiraystayaasha in lagaa saaray diiwaanka, raac talaabooyinkan soo socda:

- 1) Buuxi warqadda foomka ah ee halkan ku lifaaqan;
- 2) Warqadda foomka ah ku lifaaq koobi amarka maxkamadda ee kaa saaraya diiwaanka;
- 3) Warqadda foomka ah iyo amarka maxkamadda ee kaa saaraya diiwaanka ka samayso koobiyo;
- 4) Saxiis koobi walba ee warqadda foomka ah (koobi kasta waa in uu leeyahay saxiix asal ah oo aad saxiixday);
- 5) Boosta ugu dir koobi ah warqadda foomka ah iyo amarka maxkamadda mid kasta oo ka mid ah hay'adaha baara kiraystayaasha;
- 6) Hal koobi adigu hayso oo ha kuugu jiro diiwaankaaga.

Waxaa halkan ku lifaaqan liis ah hay'adaha baara kiraystayaasha ee ku yaal meesha aad degantahay. Liiska waa ku dhanyihiin, inkastoo, markii shirkado cusubi suuqa soo galaan, hay'adaha ku soo biiraya lagu dari karo iyadoon Maxkamaddu ogayn. Yellow Pages-ka baa ku siinaya liis buuxa oo ah labadaba hay'adaha baara kiraystayaasha iyo kuwa amaahda oo ku hoos yaal "Credit Reports".

(Taariikh)

TIX: KA SAARIDDA DIIWAANKA TALAABO MAXKAMADI KA QAADAY DACWAD QOF SI SHARCI AH GURI LOOGA SAARAY/QOF SI SHARCI DARO AH GURI UGU JIRAY:

Lid ku ah. _____

Maxkamadda degmada Hennepin Faylka HC- _____

Ku: Hay'adda Baarta Kiraystaha Guri Deegaan,

Waxaan ahay _____, oo ka mid ah kiraystayaasha kiiska kor ku xusan. Magacayga, taariikhda dhalashadayda, cinwaankayga iyo teleefoon lambar kaygu waa:

Magacayga iyo Taariikhda Dhalashadayda: _____

Cinwaan: _____

Taleefoon Lambar: _____

Waxaa laga yaabaa in rikoorkiinu muujinaayo warbixin ku saabsan kiiska kor ku xusan. Fadlan ogow, sida amarka ku lifaaqani muujinaayo, in kiisnaan laga saaray diiwaanka sida waafaqsan Minn. Stat. § 504B.241, Subdivision 4 (Xeerka Gobolka Minn. § 504B.241, Qayb hoosaadkiisa 4), qaybtiisa arrinta ku saabsan waxay oranaysaa:

Haddii hay'ad baarta kiraystayaasha [Tusaale, Shirkaddiina] ay ogtahay in faylka maxkamadda laga saaray diiwaanka, hay'adda baarta kireuystayaashu waa ka tirtiraysaa/baabi'inaysaa wax allaale iyo wixii tixraac ah oo ku jiray faylka oo hay'adda wax baartaa ay ka haysay ama fidisay/cid kale gaarsiisay.

Fadlan u saxa faylashiina iyo rikoorkiina sida loo baahan yahay .

Faqrada 2aad ee isla xeerkaas waxay oranaysaa:

Haddii uu codsado qofku, hay'adda baarta kiraystaha guri deegaan waxaa waajib ku ah in ay ogaysiiso cid alla iyo ciddii heshay warbixinta kiraystaha guri deegaan lixdii bilood ee na dhaafay in laga tirtiray.

Waxaan codsanayaa in aad samayo ogaysiisyadan "lixda-bilood".

Fadlan, wixii su'aalo aad qabto i soo wac.

Mahadsanid

(Saxiixa Kiraystaha)

Lifaaq: Amarka ka saaraya Diiwaanka (Order for Expungement)